HESHIISKA KIREEYNTA TIJAABINTA

Kani waa heshiis sharciga waafaqsan. Wuxuu sharaxayaa xuquuqda iyo mas'uuliyadaha ee Golaha Deegaanka Manchester iyo adiga oo kireesyataha

Cinwaanga Guriga la kireeya waa:

Magaca kireeystaha(yaasha) waa: **Lambarka Caymiska Qaranka**

1	
2	
3	
4	

Heshiiskaani kirada todobaadlaha wuxuu bilaawanaayaa……Kirada todobaadkii waa £……

Sarkaalkaaga guriyeeynta ayaa kuu sheegi doono inaad dalban karto gunnada kirada si laggaaga caawiyo bixinta kirada

Tirada ugu badan dadka
Loo ogol yahay inay halka degaan waa……

Haddii ay jiraan waxyaabo aadan garan fadlan weydii sarkaalkaaga guriyeeynta. Waxaad adiga taageero weydiisan karta xafiiska la talinta muwaadinka. Dadka kirada wadaaga waa inay fiiro gaar ah siiyaan qaybaha 2,3 iyo 8.6

Inkastoo aanu xoog saarnay inaanu heshiiska kireeynta si aan khalad ku jirin ugu tarjumno luqaddada. Golaha Deegaanka ma damaanad qaadi karto in tarjumidda sax tahay. Adiga waxaa ku horyaalo shuruudaha luqadda Ingiriiska ee ku qornaa heshiiska kireeynta ee aad adiga saxiixday.

Sarkaalka Guriyeeynta……Kooxda Guriyeeynta……..

Lambarka tixraaca kireeynta……Taariikhda……

1. KU SAABSAN HESHIIKAAGA KIREEYNTA

1.1 Waxaa jira laba nooc ee kireeynta golaha deegaanka:

- Kireeynta **Tibaajinta**
- Kireeynta **Babbaadsan**

1.2 Adiga waxaa kuu bilaawaneeyso **kireeynta tijaabinta**. Sida kireeystaha Tijaabinta adiga waxaad leedahay waxoogaa xuquuq sharci ah ee ka yar tan **kireeystaha badbaadsan**

1.3 Kireeyntaafa tijaabinta waa muddo laguugu eegaayo. Adiga waa inaad annaga noo muujisaa inaad tahay qof mas'uul ka ah ee gurigiisa golaha deegaanka haysan karo. Adigaa waa inaad:

- **Aadan** ku dhaqmin akhklaakhda bulshada ka soo horjeeda, sababin arbush iyo buuq ama aadan dadka khashkhashaadin; iyo
- Inaad kiradaada waqtigeeda ku bixisaa;
- Gurigaaga aad daryeeshaa.

1.4 Haddii aad adiga jebiso qayb ka mid ah shurudaha heshiiskaani ana waanu kaa saari guriga. Sida kireeyste tijaabinta adiga guriga si ka dhaqsi badan kireeystaha badbaadsan ayaa lagaaga saari kara. Laakin haddii na tusto annaga inaad tahay qof si mas'uul ah u dhaqmaayo. Adiga si toos ah u noqon doontaa kireeyste badbaadsan taariikhda ku qoran dhanka hore ee heshiiskaani.

1.5 marka aad noqoto **kireeyste badbaadsan** adiga waxaad ka heleysaa xuquuq buuxda golaha ee kireeyste golaha deegaanka. Taasi micnaheedu wuxuu yahay inaad gurigaaga haysan doonto inta muddo aad dooneeyso illaa ay meesha ka jiraan asbaab sharci oo golaha deegaanka ay ku doonaayaan inay codsadaan inay guriga kaala noqdaan ee (lagu magacaabo 'aasaaska la noqoshada' ee qaynuunka guriyeeynta). Waa in Maxkamad ogolaataa codsiga golaha deegaanka ee ka saaridda ama ku wareejinta Giri kale. Kuwaasi waxay noqon karaan labo asbaab:

1.6 **Asbaabta fal adiga aad geysatay ama ay geeysteen dad adiga kula degan ama kuwa adiga ku soo booqday:** Adiga waxaad jebisay qodob ka mid ah heshiiskaani ama aad ku bixisay macluumaad been ah foomkaaga codsiga guriyeeynta. Xaaladdaani annaga kuma siin doono guri kale.

1.7 **Asbaab duruufo gaar ahaaneed micnaheedu yahay in golaha deegaanka kaa saaran:** Taasi waxay noqon kartaa mid ku meel gaar ah ama mid joogto ah. Duruufahaani waxay ku tilmaaman yihiin heshiiskaani (eeg qodobada 3.6, 6.14, 8.9). Adiga waxaa lagu siin doonaa guri kale ee kuugu haboon, caadi ahaan adiga waxaad heli doontaa magdhow ama in lagaa taageero kharashka guuritaanka (ama labadaba) taasina waxay ku xiran tahay durufahaaga.

1.8 adiga ma qabtid xuquuqda qaarkeeda ee ku jira heshiiskaani inta aad tahay kireeyste tijaabinta. Ayaga sidaani ay loo calaamadeeyay.

Kireyteyaasha Tijaabinta MA QABAAN xaqaan. Kani waxaad heleysaa markaad noqoto kireyste badbaadsan.

1.9 adiga waxaad qabtaa mas'uuliyad dheeraad in aad tahay kireeyste tijaabinta. Adiga masuuliyaddaani ku saaran marka aad noqoto kireeyste badbaadsan. Sidaani ayaa loo calamadeeyay.

Kireyteyaasha Tijaabinta OO KELIYA. Mas'uuliyadan ma lahaan doonto markaad noqoto kireyste badbaadsan.

1.10 Haddii golaha deegaanka go'aansado inuu talaabo qaado uu heshiiskaaga ku soo gebagebeynayo adiga waxaa wargelin doonaa in laguu keeno digniin. Digniinta boosta ayuu laguu soo dhigi doonaa, ama guriga ayaa lagaga tegi doonaa ama adiga ayaa shaqsi ahaan laguu siin doonaa. Digniin kale oo loo baahdo waa la soo raacin doonaa

KIRADAADA

2.1 Adiga waa inaad kiradaada bixisaa. Waa in waqtigeeda lagu bixiyaa. Kiradaada waa in todobaad kasta la bixiyaa laakin waxaad ku bixin kartaa horumaris labadii todobaad ama bil walba haddii aad dooneeyso. Mararka qaarkooda waxaa jira todobaadyo 'lacag la'aan' oo aan kiro ka bixin (inkastoo dadka kirada ku aruurtay ay kirada bixiyaan todobaadyadaasi).

2.2 Haddii aadan kiradaada bixin, ama aad markastaba aad bixinta la daahdo, golaha deegaanka waxay tagi karaan maxkamad si ay u helaan fasax sharci ay guriga kaaga saaraan. Haddii ay dhibaato kuugu tahay bixinta kirada adiga waa inaad si deg ah ula xariirtaa lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada.

2.3 Haddii aad **heshiiska dad kale kula wadagaan** idinka **dhamaantiin** mas'uul ayaad ka tihiin kira kasta ee aruurtay. Golaha Deegaanka waa ay qaadi karaan dhamaan kirada idinku aruurtay shaqsi kasta ee heshiiskaani kula wadaago. Sidaa darteed haddii qof ka mid ah kuwa heshiiska kula wadaago uu tago, kireeystaha ama kireeystayaasha haray ayaa ka mas'uul ah kirada laga yaabo in weli la idinku leeyahay.

2.4 Kirada aad bixin doonto waxay ku xiran tahay waxyaabaha dheeraadka ee uu gurigaaga leeyahay, weynaanta, nooca iyo meesha u ku yaalo.

2.5 Kiradaada waxaa ku jirta lacag lagu bixinaayo ka qayb qaadashada go'aanada kireeystayaasha ee ka xariira adeegyada golaha deegaanka.

2.6 Waxaa laga yaabaa in kirada la kordhiyo ama la dhimo – caadi ahaan sanadkiiba mar. adiga waxaa laguugu sheegi doonaa qoraal ugu yaraan affar todobaad ka hor inta aan wax isbedelin

2.7 **Adiga waa** inaad bixisaa kira kasta laguugu lahaa ee heshiisyo hore – sida kira kuugu aruurtay ama qiimaha dayactir waxyaabo aad si ulakac ah u jebisay. Haddii aadan ilaalin qorshaha lacag bixinta lagu heshiiyay, golaha deegaanka maxkammad ayuu tagi karaa si uu helo fasax sharci ee uu guriga kaaga saaro.

2.8 **Annaga waxaanu xaq u leenahay** inaanu kuugu dallacno adeeg kasta ee cusub ee aanu gurigaaga ka qabano. Kharashka waxaa laguugu dallaci doonaa sida qayb kiradaada ka mid ah. adiga waxaa laguugu sheegi doonaa qoraal ugu yaraan affar todobaad ka hor inta aanan taasi sameeyn.

2.9 Kireeystayaalka qaarkooda waxay ka bixiyaan lacag adeegyada dheeraadka sida qayb ka mid ah kiradooda. Sarkaalkaaga guriyeeynta ayaa kuu sheegi doonaa haddii aad kuwaasi ka mid tahay. Haddii aad qabto heshiiskaan oo kale, akhri qaybta ama qaybaha hoose ee uu sarkaalka guriyeeynta uu saxay. adiga waxaa laguugu sheegi doonaa qoraal ugu yaraan hal todobaad ka hor inta wax isbedel ah lagu sameeyn adeegyadaani.

Diirinta Nidaamsan
Kiradaada waxaa ku jira lacag lagu bixinaayo diirintaada ☐

Si buuxda u Goglan
Kiradaada waxaa jira lacag lagu bixinaayo gogosha iyo qalabka aanu ku siinay. Adiga waxaa lagu siin doonaa liis waxyaabaha ka mid ah ka hor inta aadan u soo guurin. ☐

Qayb ahaan Goglan
Kiradaada waxaa jira lacag lagu bixinaayo gogosha iyo qalabka aanu ku siinay. Adiga waxaa lagu siin doonaa liis waxyaabaha ka mid ah ka hor inta aadan u soo guurin. ☐

Diirinta Dhexe
Kiradaada waxaa ku jira lacag lagu bixinaayo diirinta gurigaaga. Sanad kasta waxaanu ka shaqeeynaa inta diirin aad isticmaashay. Haddii kharashka diirinta aad kiradaada ku bixisay uu ka yar yahay inta aad isticmaashay adiga waa inaad bixisaa wixii dheeraad ah.haddii lacagta aad bixisay ay ka badan tahay waxa aad isticmaashay annaga waanu kuu so celin doonaa faraqa – inkastoo lacagta loo isticmaali doono in lagu bixiyo marka hore kirada kuugu aruurtay.

Annaga waxaanu xaq u leenahay inaanu kuu rakibno makiinada hore lacagta loogu shubo ka hor inta aan diirinta la isticmaalin intii aad ku bixin Kiradaada

☐

Adeegyada Kale
Kiraadada waxaa ku jira lacag lagu bixinaayo adeegyada dheeraadka. Oo ah: ☐

DAYACTIRADA IYO HAGAAJINTA

Mas'uuliyadda Golaha Deegaanka

3.1 **Annaga waa** inaanu ilaalinaa qab dhismeedka dibadda ee gurigaaga (kana mid yihiin majaroorka dibadda iyo qasabadaha) la dayactiro. Waa inaanu dayactirnaa si ay u shaqeeyaan.

- rakibidda qasabadaha biyaha, gaaska, korontada iyo musqulaha. Taasi waxaa ka mid ah meelaha wejiga/gacmaha lagu dhaqdo, suuliga, qubeeyska. Kuma jiraan rakibidda qalabka kale aad adiga leedahay ee isticmaala biyaha, gaaska ama korontada; iyo
- rakibidda qasabadaha diirinta iyo biyaha kulul; iyo
- meelaha caadi sida jaran jarada, ileeyska, wiishka (lift) iyo kanaalada qashinka

3.2 **annaga waa** inaanu renjiyeynaa gurigaaga dibaddiisa

3.3 **annaga waa** inaanu ku sameyn dayactirada waqti macquul ah. Marka aad soo sheegto dayactir waxaanu kuu sheegi doonaa waqtiga shaqada la qabanaayo (taasi waxay ku xiran sida ay deg deg u tahay).

3.4 **Annaga waa** inaanu meesha nadiifinaa ka dib dayactirka. Waxaanu sharaxaadda guriga kaga tagi doonaa inta suurta galka ah sida ugu dhow ka hor inta aan shaqada la sameeyn.

3.5 **annaga waa** inaanu ku siinaa ama kuu soo dirnaa adiga qoraal aanu kuugu xaqiijineeyno dayactirka (ayadoo la sameeynaayo laba maalin gudahooda mooyee). Qoraalkaani haysato waxaa laga yaabaa inaad waqti dambe u baahato.

3.6 waxaa meesha jira duruufo gaar ahaaneed marka golaha deegaanka ay xaq u leeyihiin inay gurigaaga la wareegaan maxaa yeelay shaqo in laga qabto ayaa loo baahanyahay.
Kuwaasoo ah

- Haddii loo baahdo in guriga loo faaruqiyo dayactir weyn ama la dhameeystiraayo hagaajin guud ama la duminaayo. Adiga waxaa lagu siin doonaa guriga kale ee kuugu haboon. Caadi ahaan adiga waxaa lagu siin doonaa magdhow ama in lagaa taageero guuritaanka (ama labadaba) taasi waxay ku xiran tahay duruufahaaga. Guritaanka wuxuu noqon karaa mid abadiya ah ama mid ku meel gaar ah.
- Haddii aad ogolaato inaad si meel ku gaar ahaan u guurto annaga waxaan xaq u leenahay inaan kaala noqon guriga ku meel gaarka marka gurigaaga asalka shaqadiisa dhamaato.

Xuquuqda Kireeytayaalka

3.7 **Adiga waxaad xaq u leedahay** in dayactirada waqti lagu sameeyo. **xaaladaha** qaarkooda adiga 'xaq sharci ayaad dayactirka u leedahay' – adiga waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad magdhow codsato haddii aan dayactirada qaarkooda waqti lagu sameeyn. La xariir lambarka xafiiska guriyeynta ee xaafaddaada.

3.8 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad sameeysato hagaajinta aad dooneeyso sida diirinta dhexe, qobeeyska (shower) ama gaaska dabka. Laakin adiga waa inaad golaha deegaanka ka heshaa ogolaansho qoraal ah ka gor inta aadan hagaajinta sameeyn. Annaga ogolaanshaha ma diidno ayadoo ay jiraan asbaab wanaagsan. (Waxaa kaloo laga yaabaa inaad u baahan tahay ogolaanshaha qorsheeynta dhismaha).

Kireyteyaasha Tijaabinta MA QABAAN xaqaan. Kani waxaad heleysaa markaad noqoto kireyste badbaadsan.

DAYACTIRADA IYO HAGAAJINTA

Mas'uuliyadda Kireeystaha

3.9 **Adiga waa inaad** si deg deg ah ugu soo sheegtaa lambarka xafiiska guriyeeynta ee xaafaddaada wixii cillad ah ama wixii jaba. Hubi inaad hesho ama laguu soo diro xaqiijinta ah inaanu helnay codsigaaga dayactirka (inkastoo aadan adiga heli doonin xaqiijinta hadii dayactirka lagu sameeynaayo laba maalin gudahooda)

3.10 **Adiga waa inaad** bixisaa kharashka dayactirka ama bedelidda haddii adiga (ama cid kasta ee kula ama gurigaaga soo booqaneeyso) ay khasaaraha si ulakac ah u geysteen). Adiga waxaad kaloo bixineeysa kharashka khasaaraha ka yimid dayacaad xaggaaga. Qiimaha waxaa lagu kordhin doonaa kiradaada.

3.11 **Adiga waxaad mas'uul** ka tahay dayactirada yar yar sida furitaanka qasabadaha biyaha wasaqda saara ee xirma iyo bedelidda daboolka qasabadaha iyo khataaradda iridaha gudaha. Guriyeeynta Manchester waa ay kuu sameeyn doonaan badi howlahaani haddii aad adiga tahay qof waayeel ah ama naafo.

3.12 **Adiga waa inaad** u ogolaata shaqaalaha golaha deegaanka ama dadka golaha deegaanka uu so diro gurigaaga inay kormeer ku sameeyaan, dayactir iyo hagaajin. Weligaa gurigaaga qofna ha u ogolaanin inuu soo galo adiga oo aan arkin aqonsi rasmi ah. (Haddii aad wax shaki ah qabo la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada saacadaha shaqada, ama lambarka deg deg waqtiyada kale – lambaradaani waxay ku qoran yihiin kaargaaga kirada). Xaaladaha deg degga ah waxaanu u baahanahay inaanu si dhaqsi ah u galno gurigaaga si looga hortagga khatar adiga kuugu timaada ama deriskaaga. Haddii aadan noo ogolaanin inaanu gurigaaga galno waxaa laga yaabaa inaanu talaabo sharci aanu qaadno si aanu gurigaaga u galno – adiga waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashka. Ama laguugu dacweeyo is hortaagid.

3.13 **Adiga waxaad mas'uul** tahay qurxinta gurigaaga gudahiisa. Waxaa laga yaabaa inaanu awoodno inaanu ku taageerno haddii aad tahay waayeel ama naafo – kala xariir lambar xafiiska guriyeeynta xaafaddaada si aad u hesho macluumaad.

3.14 **Adiga waxaad mas'uul** tahay dayactirka iyo sameeynta qalabkaaga sida makiinadaha cunta karinta iyo dhar dhaqidda wixii hagaajin ah oo adiga hore sameeysay (adiga oo annaga naga haysto heshiis dayactir iyo hagaajin mooyee).

3.15 **Adiga waa inaadan** derbiyada dhaqaajin ama aad dhismaha guriga wax ka bedesho adiga oo aan golaha deegaanka ka haysan ogolaansho qoraal ah.

3.16 Haddii aad gurigaa ku sameeyso hagaajin ama aad wax bedesho adiga oo aan annaga naga helin ogolaansho qoraal ah waxaa laga yaabaa inaanu kaaga codsano inaad guriga ku soo celiso sidii uu markii hore ahaa. Haddii aad sameeyn golaha deegaanka ayaa shaqada qaban doono adiga ayaana lacagta lagaa qaadi doonaa.

MAS'UULIYADDA BULSHADDA

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu noloshiisa ugu raaxeeysto sida uu doonaayo haddii aysan dadka kale ee deriskooda ah wax dhibaato ah u geysan. Golaha deegaanka waxay dadka ka caawi doontaa inay mashaakilkooda si nabad ah u xaliyaan laakin si deg deg ayaan talaabo uga qaadi doonaa haddii taasi fuli wayso iyo xaaladaha khashkhashaadka ama dulminta.

Mas'uuliyadda Kireeystayaalka

4.1 **Adiga waxaad mas'uul** ka tahay akhlaakhda qof kasta ee kula deggan (kana mid yihiin caruurta) ama kuwa ku soo booqanaayo. Adiga waxaad mas'uul ka tahay gurigaaga gudahiisa, dhulka ku wareegsan, meelaha la wadaago (jaran jarada, wiishashka {lifts} irdaha laga soo galo dhismaha, beeraha la wadaago, meelaha baabuurta la dhigto)

4.2 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** ku sameeyn buuq ama arbush ama dhibaato u geysanaayo qof kasta oo kale. Mathalan buuqa iyo arbushka waxaa ka mid ah:

- Dhawaaqa muusikada aad u dheer; muranka iyo irdaha xoog loo xiro, dhawaaqa eyga iyo saxaradiisa; sakrad dagaal. Gadista mukhadaraadka iyo ku xad gudubka maan dooriyaha; qashin daadinta, ku ciyaarista kubadda meel ku dhow guriga qof kale.

4.3 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** khashkhashaadin qof kasta oo kale. Mathalan khashkhashaadka waxaa ka mid ah:

- akhlaakh ama af midab takoor; isticmaalka ama ku handadaadka dagaal; isticmaalka erayo aflagaado ah am akhlaakh, khasaare u geysasho ama ku handadaad khasaare guriga ama hantida qof kale leeyahay, qorista handadaad, ama aflagaado gidaarada lagu xar xariiqo, sameeynta wax allaale wixii fara gelin ku sameeynaayo amaanka, raaxada iyo deganaanshaha qof kale.

4.4 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** sameeyn cabasho ama dacwad been abuur ah ee ka xariira akhlaakhda qaf kasta oo kale

4.5 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** gurigaaga ama meelaha la wadaago u isticmaalin howlo sharci darro ah sida iibinta mukhadaraadka

4.6 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** jebin, xumayn ama ku sameeyo xar xariiq hantida golaha deegaanka. Adiga waa inaad bixisa khatashka ku baxa dayactir kasta ama wixii la bedelo. Qiimaha waxaau kordhin doonaa kirada

4.7 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** fara la gelin qalabka amaanka iyo badbaadada ee daaraha – iridaha inaan la ballaqin si dad qalaad u soo galaan ayaga oo aan la weydiin waraaqaha aqoonsiga. Adiga waa inaad la shaqeeya shaqaalaha amaanka.

4.8 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** jebin wixii sharci hoosaad ah ee golaha u degsan. Adiga waxaad ku codsan kartaa inaad aragto sharci hoosaadyadaani rugta kutubta dadweynaha.

4.9 **Adiga waa inaadan** la dagaalamin. Dagaal ku handadin, ama aadan ku sameeyn ku xad gudub xagga maskaxda ama shucuurta lamaanahaaga, lamanahaagii hore ama xubin kale ee qoyskaaga ama kuwa gurigaaga deggan.

4.10 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan, ama gurigaaga soo booqanaayo) **waa inaysan** haysan ey haddii;

- adiga aad deggan tahay saro dhaadheer * ama
- gurigaaga iridda laga soo galaayo la wadaago meeshan ku qoran tahay 'ey lama ogolo' heshiiska ka dhaxeeya kireeystayaalka iyo xafiiska gurieeynta xaafadda. Si aad u ogaato in gurigaaga uu ka mid yahay kuwa heshiiska 'ey lama ogola', ama sidii aad heshiis u sameeyn lahayd, la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada.

**dadka heshiiskooda bilowday ka hor bishii October 1990 waa ay haysan karaan ey ay haysteen taariikhdaasi ka hor, lakin mid kale ma lahaan karaan*

MAS’UULIYADDA BULSHADDA

Mas’uuliyadda Kireeystayaalka waa socotaa

4.11 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan) **waa inaysan** haysan wax xawaan ah oo golaha deegaankay go’aamisay inuusan gurigaaga ama beertaada ku habooneeyn. Haddii aad wax shaki ah kuugu jiro la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta ee xaffaddaada. Xayawaankaaga waa inuusan dadka kale dhibin ama ka bajin.

4.12 **Adiga waa** inaad la shaqeeysaa golaha deegaanka iyo deriskaaga sidii ay nadiif u ahaan lahaayeen meelaha la wadaago, iyo in aan la dhigin wax waddoyinka xira

4.13 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan) **waa inaysan** wax ganacsi ah ka sameeyn gurigaaga ayadoo aan fasax qoraal ah laga helin golaha deegaanka. Annaga caadi ahaan ma diidno fasaxa haddii uusan ganacsiga uusan sababi dooni buuq ama khasaare u geysan doonin hantida

4.14 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan ama gurigaaga booqanaayo) **waa inaysan** baaburta dhigan meel kasta oo aan ahayn meelaha loogu tala galay. Guryaha lugaha ama kuwa matoorka saaran yahay waa inaan la dhigin beerta, guryaha hortooda, kabiska gurigaaga ku wareegsan ama meelaha la wadaago ayada oo aan golaha degaanka laga helin fasax qoraal ah Adiga (ama qof kasta ee kula deggan ama gurigaaga booqanaayo) waa inaysan dhigan baaburta meel kasta ee xireeyso waddooyinka adeegyada deg deg.

4.15 Haddii gurigaaga leeyahay meel loogu tala galay in baabuurta la dhigto, adiga iyo run ahaan ku soo booqda keliya ayaa isticmaali karo. Adiga waa inaadan cid kale ka gadin meesha buubuurta la dhigto.

4.16 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan ama gurigaaga booqanaayo) **waa inaysan** meesha kaga qaban baabuurta howlaha dayactirka ama dhigtaan baabur aan sharci lahayn dhulka gurigaaga ku wareegsan ama waddada.

4.17 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan) **waa inaysan** wax dhismo ah meedhs ku kordhin, sida: daash, garaash ama meesha qoleeyda ku hooyato adiga oo aan fasax qoraal ah ka helin golaha deegaanka.

4.18 **Adiga waa** inaad hubisaa in beerta gurigaaga ay nadiif tahay. Cawska waa in la gooya dhirtana la jaraa. Haddii beerta cawska ama dhirta ku badato -- meeshana wax asbaab wanaagsan jirin – golaha deegaanka ayaa nadiifin doono kharashkana kuugu oo dallaci doono adiga. Waxaa laga yaabaa inaan awoodno inaan ku caawino haddii tahay qof waayeel ama naafo ah – la xariir lambar xafiiska guriyeeynta xaafaddaada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

4.19 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan ama gurigaaga booqanaayo) **waa inaysan** ku haynin ama isticmaalin dhalooyinka gaasta, barafinka, batroolka iyo waxyaabo kale oo khatar ah guirgaaga gudahiisa ama meelaha la wadaago.

Mas’uuliyadda Golaha Deegaanka

4.20 **Annaga waa** inaan adiga, iyo qof kasta ee kula deggan idiin fidinaa wixii talo iyo taageero ah haddii aad ka cabataan akhlaakh xumo. Annaga waa baari doonaa cabashadaada, adigana waanu kula socodsiin doonaa, anagoo talaabo ka qaadi doono si dhibaatada looga hortago.

KA QAYB QAADASHADA KIREEYSTAHA

5.1 Kiradaada waxaa ku jirta lacag la bixinaayo ka qayb qaadashada kireeystayaasha ee gaarista go'aamada adeega guriyeeynta golaha deegaank

Mas'uuliyadda Golaha Deegaanka

5.2 **Annaga waa** inaanu ku weydiinaa ra'yigaaga la xariira qorshe kasta ee ka xariira isbedel lagu sameeynaayo heshiiskaaga kirada. Adiga qoraal ahaan ayaa laguugu sheegi doonaa haddii isbedelkaasi hirgali doono.

5.3 **Annaga waa** inaanu ku weydiinaa ra'yigaaga la xariira qorshe kasta ee guriyeeynta golaha deegaan haddii ay qorshahaasi adiga si toos kuu khuseeyaan – mathalan waxaanu annaga kaala tashan doonaa haddii aanu qorsheeyneyno howlo casriyeyn ama hagaajin la qaban doono gurigaaga ama xaafadda. Waxaan ka qayb gelin doonaa adiga ama kooxdiina kireeystayaasha arrimaha ku saabsan guriyeeynta xaafadda.

5.4 **Annaga waa** inaanu kuu soo dirnaa adiga sanad kasta wixii macluumaad ee la xariira howlaheena iyo wax qabadkeena. Adiga qoraal ayaa laguugu sheegi doonaa sida kharash adeega loo bixiyo iyo sida lacagtaada loo kharash gareeyo.

5.5 **Annaga waa** inaanu cabashadaada si wax ku ool ah ula dhaqanaa. Haddii aad dooneeyso inaad cabasho sameeyso, la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada.

5.6 Annaga ma aha inaan kaala tashano arrimaha la xariira kordhinta iyo dhimista kirada ama lacagta adeega laguugu dallaco (ay kireeystayaasha qaarkooda ku bixiyaan diirinta ama gogosha). Laakin waxaanu kuu sheegi affar todobaad ka hor inta kirada is bedelin ama hal todobaad ka hor isbedel kasta lagu sameeyn kharash adeega.

Xuquuqda Kireeystayaasha

5.7 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad aragta wixii macluumaad oo aan kaa hayno adiga, lamaanahaaga ama qoyskaaga. (duruufaha qaarkooda adiga ma awoodid inaad wax kasta aragto – mathalan tafaasiisha kireeystayaasha kale). Adiga nuqulo ayaad heli kartaa ee macluumaadka laakin adiga waa inaad lacag bixisaa. La xariira lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada.

5.8 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad bilawdo inaad ka mid noqoto kooxaha kireeystayasha xaafadda. La xariir lambarka xafiiska guriyeyenta xaafaddaada si aad u hesho macluumaadka la xariira kooxaha xaafaddaada iyo aad uga mid noqon lahayd.

5.9 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad timaado kulamada guddiyada golaha deegaanka kulamadaaso lagu gaaro go'aamada ah si adeegyada golaha deegaanka loo maamumlo. Adiga waxaad la xariiri kartaa Tala Bixinta Manchester ee town hallka.

ISTICMAALKA GURIGAAGA

Xuquuqda Kireeystayaasha

Kireyteyaasha Tijaabinta MA QABAAN xaqaan. Kani waxaad heleysaa markaad noqoto kireyste badbaadsan.

6.1 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad gurigaaga qof kale dejiso. Kaasi qof adiga kula deggan' laakin aan ka mid ahayn qoyskaagii markii hore kula soo guuray. Ayaga wax xaq gaar ahaan ah ma laha, waxayna heli doonaan qaar ka mid ah adeegyada sida cunta karinta iyo nadiifinta.

Kireyteyaasha Tijaabinta MA QABAAN xaqaan. Kani waxaad heleysaa markaad noqoto kireyste badbaadsan.

6.2 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad gurigaaga qayb dad kale ka sii kireeyso, laakin adiga waa inaad marka hore ka heshaa golaha deegaanka ogolaansho oo qoraal ah. Ka sii kireeynta micnaheedy wuxuu yahay qof kale ee kula deggan laakin aan ka nid ahayn qoyskaagii markii hore kula guuray, kira ku siiya oo xaq u leh isticmaalka qayb gurigaaga ka mid ah. Kuwaasoo caadi ahaan cuntadooda ayaga karsday isla markaasina qaybtooda nadiifiya. Adiga ma wada kireeyn kartid guriga gebi ahaan.

Mas'uuliyadda Kireeystayaasha

Kireyteyaasha Tijaabinta MA QABAAN xaqaan. Kani waxaad heleysaa markaad noqoto kireyste badbaadsan.

6.3 Haddii aad dooneeyso qof kale oo aan ka mid ahayd qoyskaaga markii hore oo aad soo guurtay inuu kula joogo (ku meel gaar ahaan ama si joogto ah), adiga waa inaad naga heshaa marka hore ogolaansho qoraal ah. Kuwaani waxaa ka mid ah caruurm qaraabo, asxaab, iyo marti. Annaga ma diidno fasaxa haddii aysan meesha jirin asbaab fiican (sida: haddii laga yaaboo qofka inuu asbush sababayo).

6.4 **Adiga waa** inaad gurigaaga golaha deegaanka u isticmaasha inuu yahay hooygaaga guud

6.5 **Adiga waa** inaad u sheegta lambarka xafiiska guriyeeynta ee xaafaddaada haddii aad gurigaaga ka maqnaandoonto wax ka badan hal bil. (taasi si aanu u ogeeno inaad gurigaaga adiga isaga tegin).

6.6 Haddii aadan gurigaaga u isticmaalin sida hoygaaga guud, ama aadan noo sheegin marka aad ka maqnaan doonto wax ka badan bil, waxaanu kaa qaadi doona talaabo ah inaanu geba gebayno heshiiskaaga kirada.

6.7 **Adiga waa** inaad si deg deg ugu soo sheegtaa lambarka xafiiska guriyeeynta ee xaafaddaada wixii jaba ana ka xumaada guriga.

6.8 **Adiga waa** inaad ka shaqeeysaa in xaaladda gurigaaga ahaato mid wanaagsan, nadiif ah iyo inay jirin wax kenaayo khatar in dab kaco, iyo inaad noo ogolaato inaanu galno si aanu u sameeyno wixii dayactir ah ama ahagaajin. Adiga waa inaad qalabka guriga ku rakiban u isticmaashaa si macquul ah.

6.9 **Adiga** (ama qof kasta ee kula deggan ama gurigaaga booqanaayo) **waa inaysan** faraha la gelin gaaska ama korontada, iyo mitirada gaska iyo korontada.

6.10 **Adiga waa** qiimaha dayactirka ama bedelidda wixii si ulakac ah loo jebiyo ama la dayacay (mathalan: biyo daadanaayo ama qasabad jabtay oo aan la soo sheegin). Waxaa laga yaabaa in qiimaha lagu kordhiyo kirada.

6.11 **Adiga waa** inaadan gurigaaga dejinin tiro dad ka badan inta laguu ogol yahay. Tirada la ogol yahay waxay ku qoran tahay heshiiska.

6.12 **Adiga** (qofkasta ee kula deggan, ama soo booqanaayo gurigaaga) **waa inaadan** ku hayn qalabka wax lagu tir tiro, mootooyinka/baskiilada gurigaaga dhexdiisa ama meel la wadaago gudahooda (hollalka laga galo guriga, jaran jarada iyo iwm).

6.13 **Adiga waa** inaad hubisaa in beertaada ay nadiif tahay cowska waa in la jara dhirtana la gooyaa. Haddii beerta cowska ku bato-meeshana aysan jirin sabab wanaagsan aadan u sameeyn Karin – golaha deegaanka ayaa nadiifin doono kharashkana kuugu soo dallaci doono. Annaga **waxa laga yaabaa** inaanu ku caawino haddii aad waayeel ama naafo tahay – si aad u hesho macluumaad dheeraad ah la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada.

6.14 **Adiga ayaa mas'uul ka ah** qurxinta gurigaaga gudahiisa. Annaga **waxa laga yaabaa** inaanu ku caawino haddii aad waayeel ama naafo tahay – si aad u hesho macluumaad dheeraad ah la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada.

Mas'uuliyadda Golaha Deegaanka

6.15 waxaa meesha jira duruufaha qaarkooda marka golaga deegaanka ay xaq y leeyihiin inay guriga kaala wareegaan. Waanu ku wareejin karnaa haddii guriga uu leeyahay hagaajinta loogu tala galay dadka naafada oo meesha hadda degganayn. Laakin taasi ku sameeyn **xaalado aad gaar u ah –** haddii guriga uu u baahan yahay qof kale oo naafo ah oo aan haysan meel ku haboon oo uu ku noolaado. Xitaa haddii ay taasi dhacdo adiga waxa lagu siin guriga kale ee kuugu haboonka hor in aan lagu rarin.

U GUURISTA GURI KALE EE GOLAHA DEEGAANKA

Xuquuqda Kireeystayaasha

7.1 **adiga waxaad xaq u leedahay** inaad dalbato inaad inaad ku wareegto guri kale ee golaha deegaanka. Laakin annaga waxan guri ku siin doonaa o keliya haddii kulmiso shuruudaha qarkooda. Adiga waxad xaq u leedahay inaad aragto hababka aanu ku go'aamino cidda hesho guri golaha deegaanka. Waxaad kaloo adiga xaq u leedahay inaad aragto hababkeena oo la soo koobay ee cidda heshi guri golaha deegaanka.

Kireyteyaasha Tijaabinta MA QABAAN xaqaan. Kani waxaad heleysaa markaad noqoto kireyste badbaadsan

7.2 **Adiga waxaad xaq u leedahay** inaad ka bedelato gurigaa (taasoo lagu magacaabo kala bedelasho) qof kale ee deggan guri golaha deegaanka ama ururada guriyeeynta, ama gole deegaan kale.laakin adiga waa inaad heshaa ogolaanshaha golaha deegaanka oo qoraal ah. Annaga ma diidi karno ogolaanshaha, haddii aysan:

- mid guryaha ka mid aan dadka ku badanayn – la xariir lambarka xafiiska guriyeeynta xaafaddaada si ad u ogaato tirade dadka loo ogol yahay guriga; ama
- golaha deegaanka ay qaadeeyso talabo sharci oo ay dooneeyso inay kula wareego guriga mid ka mid ah kireeystayaasha.
- kala bedelashada oo faaruq ka dhigi doonto guri loo hagaajiyay qof waayeel ah ama dad naafo aan heli doonin meel ay degaan kuwaaso u baahan guryo la hagaajiyay
- mid guryaha ka mid ah oo ku weynaan doono kireeystaha cusub

Waxaan kaloo dejinaa shuruudaha qaarkooda oo la doonaayo inaad adiga ka soo baxdo ka hor inta kala bedelashada la fulinin

- adiga waa inaan laguugu lehayn wax kiro ah (adigoo wada bixinta kirada kuugu aruurtay waqti lagu heshiiyay); iyo
- gurigaaga iyo beertaada oo xaaladdooda wanaagsan tahay; iyo
- haddii aad guriga wax bedeshay ama aad hagaajin ku sameeysay adigoo aan fasax naga helin annaga waa inaad sidiise hore ku soo celisaa.

  Haddii aad guriga kala bedelataan adigoo aan annaga naga helin fasax qoraal ah, waxanu qaadi doonaa talaabo sharci ah inaanu kaa saarno guriga. Adiga ma awoodi doonto inaad dib ugu laabato gurigaagii hore, mana lagu siin doono guri kale.

8. KA TEGISTA GURIGAAGA & GEBA GEBEYNTA HESHIISKAAGA

Mas'uuliyadda Kireeystayaasha

8.1 **Adiga waa inaad** u sheegta xafiiska guriyeeynta ugu yaraan affar todobaad ka hor marka aad dooneeyso inaad gurigaaga ka tagto. Affarta todobaad ee digniinta waa inay ku dhamaataa maalin Isniin ah ee aad furaha gurigaaga aad ku soo celineeyso xafiiska maalinta aad tegeyso.

8.2 **Adiga waa inaad** inaad ka tagtaa guriga, qalabka iyo gogosha kasta aanu ku siinay ayadoo xaaladooda fiican tahay marka aad tegeyso. Ha kaga tegin wax aad adiga leedahay – golaha deegaanka waa dadin doonaa.

8.3 **Adiga waa inaad** bixisaa kharashka dayactirka iyo bedelidda wixii si ulakac ah loo jebiyay ama ku timid dayacaad adiga aad dayacday. Adiga ma bixin doonto wixii si caadi ah u duugoobay.

8.4 **Adiga waa inaadan** gurigaaga cidna ugu tegin marka ad gurto. Adiga heshiiskaaga kirada dad kale uma gudbin kartid. (lagu magacabo 'assignment').

8.5 waxaabu annaga leenahay habab ku saabsan cidda heli karto mustaqbalka guri. Iyo tusaalooyinka sababta aanu kuu siin doonin guri kale adiga waxaa ka mid ah haddii:

- Adiga guri lagaa saaray; ama
- Adiga gurigaaga isaga tagto (aad ka baxdo adiga oo aan digniin bixin furahana aadan soo celin);
- Adiga aad gurigaaga ka tagto adiga oo kiro laguu leeyahay (adiga sameeyn heshiis sidii aad kirada u bixin lahayd);
- Adiga aad gurigaaga kaga tagto xaalad xun adiga oo aan bixin kharashka dayactirka ama bedelidda.

8.6 Haddii aad heshiiska kireeynta aad dad kale la wadaagto mid kasta oo idiinka mid ah waa geba gebeyn heshiikska asagoo na siinaayo affar todobaad oo digniin ah. Annaga ayaa go'aamin doono haddii kireeystaha kale guriga ku hari karo.

Xuquuqda Kireeystayaasha

8.7 **Sharciga wuxuu** leeyahay haddii aad geeriyooto, heshiiska kireeynta guriga wuxuu u wareegi doono ninkaaga ama afadaada. Ama waxaa lagu wareejin karaa qaraabo (waalidka, ilmahaaga kuwa ilmahaga dhaleen, walaalkaa, walaashaa, adeer/abti/ eeddo/aayo, kuwa walaalahaa ay dhaleen) haddii ay ayaga kula deganayaan 12kii bilood ee ugu dambeeysay.

Nidaamka golaha deegaanka ayaa xuquuqdaani siiya: a) heshiikaaga kirada loo wareejin karaa cid kula deganayd sida qayb ka mid ah lamanahaaga lesbiyanka ama khaniiska; b) qofka qaraabaad oo qaadanaayo heshiiskaaga kirada waa inay kula deganayeen lixdii bilood ee ugu dambeeysay oo keliya

8.8 Haddii aad heshiiska kireeynta kala wareegtay qof kale oo qaraabo ka dib kireeystahii hore oo geeriyooday, heshiiska kuma wareegi karo qof kale haddii aad adiga geeriyooto. Laakin **waxaa laga yaabaa** inaanu ogolaano inaanu siino heshiis kireeyn cusub isla markaana u ogolaano ayaga inay guriga sii deganaadaan.

8.9 Haddii guriga uu ku wareego qof qaraabo ah, gurigana uu ka weyn yahay kan ay u baahan yihiin, waxaanu xaq u leenahay inaanu ka saarno. Laakin waxaanu siin doonaa guri kale ee ku haboon. Tani waa wax ka mid ah durufaha gaarka marka aanu xaq u leenahay inaanu dadka kala wareegno. Laakin kama saari doono ninkaaga iyo afadaada, ama qofka kuula noola si lamaane, isla xaaladdaasi.

8.10 adiga waxaad xaq u leedahay inaad gadato gurigaaga golaha deegaanka – adigoo degan guryo noocyo gaar ah mooyee, sida guryaha u gaarka dadka waa weyn, ama dadka naafada. Adiga aad ahayd kireesyte guriga golaha deegaanka magaalada Manchester ama ururada kale ee guriyeeynta (gole deegaano kale ama ururada guriyeeynta marka isu geeyo muddo laba sano – looma baahno inay ahaadaan labo sano ee isda jog ah.

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu
Noloshiisa sida u doono ugu raaxeeysto
Ayaga oo dadka kale wax u dhimeeyn

Ilaalinta heshiiskaani kireeynta, adiga
Iyo Golaha Deegaanka waxaad gacan
Ka geysaneysaan sidii aad Manchseter u
noqon lahayd meel si fiican loogu noolaado